Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Saddex shaqaalaha gargaarka ah oo u shaqeynayey hay'adda La-dagaallanka Gaajada ee ACF ayaa 3dii Oktoobar lagu sii daayey Soomaaiya. Saddexda qof waxaa laga qafaashey magaalada xuduudda Kenya ku taalla ee Mandheera waxaana loo kaxaystey Soomaaliya 17kii Luulyo. Waqtigan la joogo, 10 shaqaalaha gargaarka bani'aadamnimada ah ayaa weli lagu haystaa Soomaaliya.

1dii Oktoobar, dagaal ayaa ka dhex dillaacay laba kooxood oo Islaamiyiin ah oo isku haystey xukunka magaalada Kismaayo, gobolka Jubbada Hoose, kaas oo ay ugu yaraan ku dhinteen 15 qof, ayna ku dhaawacmeen in ka badan 50 kale. Siddeed qof oo kale ayaa ayaa ku dhintey 15 kalena waa ay ku dhaawacmeen iskudhacyo soo cusboonaadey 4tii Oktoobar. Tiro aan la xaqiijijin oo dad ah ayaa ku barokacay kuwaas oo badidoodu aadeen degaannada Jilib iyo Jamaame ee Jubbada Dhexe. Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyta Cas (ICRC) ayaa sahay daawo oo degdeg ah u direy xarumo caafimaad oo kala duwan oo ku yaalla degmooyinka Kismaayo, Mareerey, Dhoobley, Afmadow iyo Jilib ee gobollada Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose. Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ayaa sidoo kale laba dhaqaatiirta qalliinka ee dagaalka ah iyo suuxiye u direy Kismaayo si ay u taageeraan cusbitaalka degaanka, iyaga oo horey u sii qaadey 400kg oo sahayda qalliinka loo isticmaalo oo ay ICRC bixisey ah si loogu daweeyo bukaannada dagaalka ku dhaawacmey.

Toddobaadka dhexdiisa, waxaa lagu soo waramey duqeyn culus oo loo geystey meelo badan oo ay dadka rayidku ka deggan yihiin magaalada Muqdisho. 3dii iyo 4tii Oktoobar, ayaa suuqa Bakaaraha la duqeeyey markii uu dagaal ka dhex dillaacay kacdoonsanayaasha iyo Ciimada Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISON) kaas oo ay ku dhinteen ugu yaraan 10 qof ayna ku dhaawacmeen in ka badan 20 kale. UNHCR ayaa sheegtey in dagaalka u dhexeeya kooxaha kacdoonsan iyo ciidamada dowladda ay bishii Sebtembar Soomaaliya ku dileen 145 qof ayna ku dhaawacmeen 285 kale, kuwaas oo badidoodu joogey Muqdisho, Kismaayo iyo Balad Weyne. Ilaa 17,000 oo qof ayaa ka barokacay saddexda magaalo, kuwaas oo ay ka mid yihiin 11,000 oo ka tegey Muqdisho.

Bishii Sebtembar, WFP ayaa 1.3 milyan oo Soomaali nugul ah oo dalka ku baahsan ku gargaartey ilaa 22,170 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah. Baahida cuntada gargaarka ee bishii Sebtembar waxa ay ahayd 48,000 metrik ton oo lagu gargaari lahaa 3 milyan oo Soomaali nugul ah kuwaas oo badidoodu loo sii marin lahaa waxqabadyada gargaarka iyo kuwa nafaqeynta. Haseyeeshee, maaliyadda Hawlgalka Degdegga ah oo yareyd daraaddeed (44 boqolkiiba intii loo baahnaa) iyo cuntada kala go'day ayaa WFP ku khasbey in ay dhinto raashinkii ayna dib mudnaanta u siiso waxqabadyada nafaha lagu badbaadinayo. WFP waxa ay degdeg ugu baahan tahay US$195 milyan si ay u sii waddo gargaarka cunto ee ay u fidiso 3.3 milyan oo Soomaali ah ilaa bisha Abriil 2010-ka.

Warar ayaa tibaaxaya in waraaqo lagu daadiyey hareeraha cusbitaalka Madiina ee magaalada Muqdisho, kuwaas oo ku eedeynaya in dhakhaatiirtu ay daaweeyaan ciidamada dowladda ayna taageero ka helaan cadowga Islaamka. Dhakhaatiirta iyo shaqaalaha ayaa la sheegey in ay ka xumaadeen arrintaas ayna ku dhaarteen in ay wadi doonaan gudashada waajibaadkooda. Kooxina ma sheegan in ay waraaqahaas daadiyeen.

Waxqabadka

Toddobaadka dhexdiisa, UNFPA oo uu weheliyo NGO-ga degaanka ee COCO ayaa 300 oo Xirmooyinka nadaafadda ah ugu qaybiyey haween iyo rag deggan degsiimada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Avazioni ee magaalada Muqdisho. Sidoo kale, NGO-ga Dawa Al-Islam ayaa 120 xirmooyinka nadaafadda ah u qaybiyey haween uur leh isaga oo u sii mariyey Xarumaha Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka ee degaannada Shibbis iyo Arjentina. Xirmada nadaafaddu waxa ay ka kooban tahay saabuun, shukumaan, oomo, caafi-dhowrka haweenka, go'yaasha sariirta, funaanado garab leh, saliid, iyo waxyaabo kale.

UNFPA oo ay iskaashanayaan NGO-ga COGWO, ayaa olole wax looga qabanayo *fistula* ka bilaabey Muqdisho iyaga oo u maraya Cusbitaalka AMISOM. In ka badan 20 bukaannada qaba *fistula* ah ayaa durba la qaley.

1dii Oktoobar, NGO-ga *Centre for Peace and Democracy* ayaa mashruuc biyo-dhaamin ah oo bil soconaya ka bilaabey degaanka ay abaartu saameysey ee Cadaado ee gobolka Galgaduud. Mashruuca waxa uu 5 litir oo biyo ah uu maalin kasta siinayaa 54,000 oo qof oo ku nool 69 tuulo oo daaqsato ah.

Magaalada Waajid ee gobolka Bakool, waxaa lagu soo dhammeystirey dhismaha lix fasal iyo musqulo u kala gaar ah wiilasha iyo gabdhaha, xafiis, bakhaar iyo haan-biyood oo ay ka faa'iideysanayaan 400 oo carruur ah (240 gabdho yihiin). Mashruuca oo ay taageertey UNICEF waxaa hirgeliyey Guddiga Waxbarashada Bulshada ee Waajid, oo taageero farsamo ka helaya UNOPS.

6dii Oktoobar, *Concern World* oo soo marisey *NGO-ga LIFELINE GEDO* ayaa magaalada Beled Xaawo ee gobolka Gedo, ku soo gabagabeysey hawlihii biyo-dhaaminta ee laga waday 14 tuulo oo ku yaalley degmada Ceelwaaq. 224,000 litir oo biyo ah ayaa la gaarsiiyey 21,330 qof. Intaa waxaa dheer, in NGO-ga AMA uu 84.5 metrik ton uu cunto gargaar oo kala duwan uu ugu qeybiyey 9,000 oo qof degmooyinka Ceel Waaq iyo Beled Xaawo. Sida ay sheegtey AMA, cuntadaas gargaarka oo ka koobneyd badar, digir, iyo saliidda cuntada waxaa loo qaybiyey dadka ugu nugul ee ay ku jiraan Dadka Gudaha ku Barokacay, naafada iyo waayeelka

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org.
Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org